Gabaad ka helid isla-Meshaad Joogto

Xaaladaha deg-degga ah qaarkood, khaasatan, dhacdooyinka kiimikada, bayoolojiyada ama, argagixisada saraakiisha deegaanka ayaa dhici karta inay ku taliyaan "gabaad ka helid isla-meeshaad joogo". Haddii ay arrintu sidaas noqoto, qoyskaaga iyo xirmada sahayda iskugu keen gudaha. Isticmaal tuwaal (shukumaan) ama maro qoyan sidii aad u hesho (ama aad u siiso qofka) wax-ka-ilaalin neefsi. Xir dhammaan dariishadaha, albaabbada iyo goobta dabka lagu shito. Dhammaantood dami marawaxadaha iyo nidaamyada kuleylinta iyo qaboojinta hawada. Haddii si kale laguugu tilmaamo mooye, aad qol dhexaad heerka dhulka ka sareeya oo ku dhaji teyb xabageysan daaqadda iyo albaabka dalool-ladooda iyo meelaha neeftu ka soo gasho. Sug markaa wixii amarro iyo tilmaamo ah ee ka yimaad saraakiisha.

Ku tababbaro Qorshahaaga

Qorshaha ugu wanaagsan ayaa xitaa waxba aan tarayn haddii lagu tababbarto oo lagu macaamilo mooyee. Had iyo jeer dib-ugu-noqo, kuna tababbaro oo cusbooneysii qorshahaaga.

Haddii ay Aafadu dhacdo

- Isdaji oo samir yeelo.
- Ku shaqeyso qorshahaaga xaaladaha deg-degga ah.
- Sii gacan-qabasho dadka baahida gaarka ah leh iyada oo raacaysa qorshahaaga.
- Jeeg garee inay dhaawacyo jiraan.
- Dhagesyo wararka deegaanka sidii aad u heli lahayd macluumad iyo tilmaamo.

Aafada ka Dib

- Raac qorshahaaga adiga oo isticmaalya qoshaha loo talagalay aafada gaarka ah.
- Dhagesyo warbixmaha wararka sidii aad u heli lahayd macluumad iyo tilmaamo.
- Qiyaas xaaladda gurigaagu u ku jiro adiga oo isticmaalaya toosh, oo aan isctmaalin ololl qaawan.
- Ha soo galin dhisme aan badbaado lahayn.
- Sanka la raac (urso) inay jiraan daroorimo gaas, iyada aad ka bilaabmeyso kuleyliyaha biyaha.
- Xir Wayaabaha loo isticmaalo guriga (sida gaaska, biyaha iwm.) ee xumaada.
- Nadiifi wixii kastaee qubta ee khatar keeni kara ama ololi kara.
- Daawee dhaawacyada.
- U wargali dadyowga aad deegaanka iyo wixii ka baxsanba aad kala xiriirto, dabadeed isticmaal taleefanka sidii aad u ugu wargalin lahayd xaaladaha deg-degga aha ee nafta halista galinya.
- Diiwangali burburka dhaca adiga oo ugu talagalaya wax-sheegadyada (claims) caymiska.

Tilmaamaha Deg-degga ah ee loogu Talagalay Khataraha Dhici Kara

Dabka

- Kaliya la-dagaallan dababka yar-yar ee qatarka ku ah inay kaa xiraan irridaha.
- Gacanta baabbacda dhinaceeda kale isticmaal si aad u dareento inuu albaabku aad u kulul yahay.
- Qiiqa hoos uga guurguuro.
- Haddii aad meelna ka bixi kari weydo, xir albaabka oo ka soo laalaadi go' dariishadda.
- Iskugu kaalaya bartii aad isku ogeydeen.
- Waligaa dib ha ugu noqon dhisme gubanaya.
- Uga waco 911 guriga jaarka.

Ufada weyn ee siigada kicisa (tornado)

- Marka lagu jiro iska-ilaalinta aafada (watch), ka feejignow xaaladaha cimilo maalmeedka.
- Isla markaaba gabaad (shelter) raadso haddii digniin la soo saaro.
- Qolka guriga hoostiisa ah (basement) tag ama marin-dhexaadka guriga (internal hallway).
- Ka fogow dariishadaha, muraayadaha ama waxyaabaha soo duuli kara.
- Ku daa dariishadaha xirnaantooda.
- La soco warbaahinta oo raac fariimaha ka imanaya saraakiisha gobolka iyo degmada.

Daadka

- Wakhtiga isa-ilaalinta (watch) lagu jiro, u diyaar-garow inaad ka qaxdo meesha.
- Markay jirto digniin daad rogmada (flash flood warning), isla markaaba ka qax meesha.
- Ka buuxso biyo weelasha maran iyo weelka qubeysiga (bathtub), walow ay dhaco wax-faddaran (contamination).
- Iska ilaali daadadka iyo meelaha daadka ku habboon.
- Waligaa baabuur iyo wax la mid ah ha ku kaxaysan waddo daadku socodaan.
- Ka xir batroolka dareeraha laga dhigay (liquefied petroleum) haamaha ilahooda.
- La soco warbaahinta oo raac fariimaha ka imanaya saraakiisha gobolka iyo degmada.

Sii-deynta Kiimikada/Dhacdada Bayoolijiyeed

- Kala soco warbaahinta amar-tilmaameedyada: U-HOGGAANSANOW.
- U diyaar-garow inaad ka qaxdo oo aad gabaad ka hesho isla-meesha aad joogto.
- Ka fogow dadka waxyeelladu gaareen illaa halistu waxay tahay la garanayo.
- Joog dhinaca dabayshu ay ka dhacayso, ku qaado tuwaal qoyan neefsi gaaban.
- Iska ilaali cuntooyinka, biyaha iyo agagaaraha suurtagalaka ah inay faddaroobeen.

Kheyraadka Kale

Laanqeyrta Cas ee Mareykanka (American Red Cross) ..... www.redcross.org
Wakaaladda Federaalka ah ee Maareynta Xaaladaha Deg-Degga ah ..... www.fema.gov
Wakaaladda Maareynta Xaaldaha Deg-Degga ah ee Ohio ..... www.ema.ohio.gov
Adeegyada Caafimaadka Xaaldaha Deg-Degga ah ee Ohio ..... www.ems.ohio.gov
Nabad-Ilaalinta Dalka ee Ohio (Ohio Homeland Security) ..... www.homelandsecurity.ohio.gov
Ururka Muwaaddiyiinta Mareykan ..... www.citizencorps.com
Waaxda Nabad-Ilaalinta Dalka Mareykanka ..... www.ready.gov

Xoogga Hawsha Nabad-Ilaalinta ee Gobolka Ohio

OHIO DEPARTMENT OF PUBLIC SAFETY
EDUCATION • SERVICE • PROTECTION
WWW.PUBLICSAFETY.OHIO.GOV
(614) 466-4775

EMA 0102 12-12 [760-1282]

HAGAHA U DIYAAR-GAROWGA AAFADA EE QOYSKA OHIO

DABKA
DAADKA
UFADA WEYN EE SIIGADA KICISA
ARGAGIXISDA

Xusuusnnaata, Diyaar-Garowga = Waa Badbaaditaan

Halkeed Adiga iyo Qoyskaabu ku Sugnaan Doontaan markay Aafadu Dhacdo?

Meel kasta ayey dhici karta inaad joogtaan – shaqada, dugsiga ama baabuurka gudhiisaba. Sideed isku heli doontaan? Miyaad garan doontaa inay carruurtaadu ammaan galeen?

Xaaladaha deg-degga ah iyo aafooyinku waxay u dhici karaan si deg-deg ah iyo digniin la'aan. Waxay kugu jaribi/kalifi karaan inaad ka qaxdo xaafaddaada ama waxay kugu xannibi karaaan guragaaga. Maxaad samayn haddii adeegyada aasaasiga ah — biyaha, gaaska, korantada ama taleefanka —ay go'aan?

Waxa jira tallaabooyin qaarkood oo fudud oo loogu diyaargaroobi karo oo lagaga hortagi karo xaaladaha deg-degga ah ee iman kara, oo ay ku jiraan aafooyinka dabiiciga ah iyo weerarrada argagixisada. Saraakiisha deegaanka iyo shaqaalaha gurmadka ah ayaa goobta joogi doona kadib aafada, laakiin cid kasta uma soo gurman karaan isla markaaba. Waad la qabsan kartaa aafada adiga oo horay ugu sii diyaargarooba: soo ogow khataraha dhici kara iyo sidii looga hortagi laha, oo sameyso xirmo alaabo aad u isticmaasho xaaladaha degdegga ah, abaabulana qorshe qoys oo xaaladaha deg-degga ah lagaga hor tago.

Xog Ogaal Ahow

Soo ogow noocyada aafooyinka, kuwa dabiiciga ah iyo kuwa dadku-sameeyaan labadaba, oo ay u baadan tahay inay ka dhacdo agagaarkaaga iyo sidii laguu soo wargalin lahaa. Hababka adiga arrinta laguugu soo jeedin lahaa ayey ku kala duwan yihiin beeluhu. Hab laga siman yahay ayaa ah mid laga sii daayo raadiyaha xaaladaha deg-degga ah iyo telfishinka. Waxa kale oo laga yaabaa inaad maqasho seeri ama firimbi cod gaar ah (siren), ama aad hesho taleefan laguu soo diro ama shaqaalaha xaaladaha deg-degga ah ayaa kolba alabaab ka albaab ku garaaci.

Qorshyaasha Aaafada ee Beesha

Ka warhay qorshayaasha u-gurmadka Beesha, qorshayaasha qixinta iyo gabaadyada xaaladaha degdegga ah loogu talagalay. Wax ka wareyso qorsheyaasha xaaladaha degdegga ah ee loogu talagalay iyo habsocoyada ka jira meelaha adiga iyo qoyskaaguba aad wakhtiga ku qaadataan ee ay ka midka yihiin shaqada, dugsiyada iyo xarumaha daryeelka ilmaha. Haddii aadan lahayn baabuur iwm. ama aadan wadi karin baabuur iwm., horraan u sii hel sida qorshaha beeshaadu ay daadgurayn doonto dadka aan lahayn gaadiidka u gaarka ah.

Nidaamyada U-Digniinta Beesha

Soo ogow habka saraakiisha deegaanku ay kuugu digi doonaan aafada kugu soo food leh iyo siday kuu siin doonaan macluumaad adiga marka ay jirto aafadu iyo wax ka dambeeyaba. Wax ka baro Raadiyowyada Cimilo-Maalmeedka NOAA iyo awoodohooda digniineed (www.noaa.gov). Raadiyowyada cimilo-maalmeedka ayaa lagu baroograam gareyn karaa warbixinta cimilo-maalmeedka waxyaabaha la iska ilaalinayo iyo digniinaha ka jira agagaarahaaga. Ilaha kale ee la isku hallayn karo ee loogu talagalay la socodsiinta cimilo-maalmeedka ayey ka mid yihiin Nidaamka Digniinta Xaaladaha Deg-Degga ah ee laga sii daayo telefeeshinka iyo rugaha raadiyaha maxalliga ah, Jaanelka Cimilo-Maalmeedka iyo "siren"-nada Digniinta ee ku yaal dibadda. Intaa waxa u dheer, inaad soo ogaato qorshooyinka ku saabsan xaaladaha deg-degga ah ee ay u dajisey dawladda hoose agagaarahaaga.

Abaabulo Xirmo Keyd (Supplies Kit)

Xirmada sahayda aafadu waa urursi sheyo laga maaarmaan ah oo qoysku laga yaabaa ugu baahan doonaan inay ku badbaadaan oo ay dhibaatdu kaga yaraato markay aafadu dhacdo. Ka fikir meesha aad ku nooshay iyo baahiyada goonida ah ee ay qoyskaagu leeyihiin si aad u diyaarsato xirmada. Waxaa lagu ritaa weel la qaadan karo oo suurtagal ah uguna dhow illinka/albbaabka laga baxayo. Dib ugu fiirso waxyaabaha ku jira xirmadaad ugu yaraan hal jeer sannadkii, ama kolba sida qoyskaagu ugu baahdaan isbeddel. Waliba, ka fikir inaad ku haysato sahayda xaaladaha degdegga ah baabuur (iwm.) kasta iyo meesha aad ka shaqeyso ma meelaha kale ee aad wakhtiga ku lumiso.

Sheyda lagugula talinayo inaad ku haysato Xirmo sahayda keydka aasaasiga ah

- Biyo: Hal galaan oo biyo ah qofkii maalintii kasta ugu yaraan saddex maalmood.
- Cunto: Ugu yaraan cunto aan-xumaan ayn/hallaabayn oo sahay saddex-maalmood ah.
- Raadiyo beytari (dhagaax) ku shaqeeya ama gacanta lagu kixiyo (handhariyo) iyo Raadiyaha Cimilmo Maalmeedka NOAA oo leh codka digniinta oo labuduba leeyihiin beytariyo dheeraad ah.
- Toosh iyo beytariyo dheeraad ah.
- Xirmo keyd gargaarka kowaad ee caafimaad.
- Firimbi (siidhi) u soo gurmadka calaamad u noqoda.
- Maaskiga boorka, oo ka caawinaya qofka kala miirka hawada faddareysan, iyo baco balaastik ah iyo teyb (duct tape) waxa la isku dhajiyo sidii loo samaynsan lahaa gabaad-meel-joog ah (shelter-in-place).
- Faratir-tiryo qoyan (Moist towelettes), baco qashin iyo balaastigga lagu xiro oo loogu talagalay nadaafadda shaqsiga.
- Baanado iyo kelbado loo isticmaalo sidii lagu damin lahaa waxyaabaha la isticmaalo (gaaska, biyaha iwm.).
- Qasax-furaha loo isticmaalo cuntada (haddii xirmad ay kuugu jiraan cunto qasacadaysan).
- Khariidadaha (maababka) deegaanka.

Sheyo Dheeraad oo ah in laga la Fakarayo

- Murayaadaha (okiyaalaha) iyo daawooyinka dhakhtarku qoro.
- Foormulada (caanaha) iyo xafaaydaha (daybarrada) ilmaha.
- Cuntada rabaayadda (pet) iyo biyo dheeraad ah oo loogu talagalay rabaayadda.
- Dukumentiyada qoyska u muhiimka ah ee ay ka midka yihiin nuqullada heshiiyada caymis, aqoonsiga, diwaannada akoonka bangiga oo ku dhex jira weel la qaadan karo oo biyo waxba-kama-qaadaan ah.
- Lacag kaash ah ama jeegyada socdaalka (traveler's checks) iyo lacag qadaadiic (sarif) ah.
- Buste-gogol lagu socdaalo leh (Sleeping bag) ama buste diiraan oo qof kasta goonidiisa loogu talagalay.
- Dhar beddel ah oo ay ku jiraan shaar gacmo dheer ah, surwaal dheer iyo kabo adag. Ka fakar inaad ugu diyaariso dhar dheerad ah cimilada qabow.
- Qalabka dabka damiya.
- Kebriiddo (tarraqyo) ku jira weel biyo waxba-kama-qaadaan ah.
- Sheyda haweenka u gaarka ah iyo sheyda nadaafadda shaqsiga loogu talagalay.
- Alaabaha jikada lagu isticmaalo iyo maacuunka.
- Waraaq iyo qalin rasaas.
- Buugaag, ciyaaro, xujooyinka (puzzles) iyo waxqabadyo kale oo carruurta loogu talagalay.

Waxyaabha loogu talagalay gaadiidkaaga

- Toosh, beytariyo dheeraad ah iyo khariidado (maabab).
- Qalabka gar-gaarka caafimaad ee ugu Horeeya iyo tilmaamahiisa Calan cad oo loogu talagalay saxariirka soo gurmada.
- Xirmo hagaajinta shaagga, xarkaha baabuurta lagu kiciyo (jumper cables) iyo qalabka hawada shaagga lagu buuxiyo (pump) iyo holaca calaamdda u ah u soo gurmadka (flares).
- Biyo dhaleysan iyo cunto aan-xumaan oo ay ka midka yihiin "granola bars".
- Sahay ka kooban alaabo xilliyeed: Guga (xilliga Qaboobaha) – buste, koofiyad, qalabka gacmaha la gashado (mittens), majarafad, cammuud, silsilado shaag, nadiifiyaha muraayadda baabuurka, calanka saxariirka ee dhalaala. Xagaaga (xilliga kuleylaha)–kiriimka qorraxda (sunscreen), shey la harsado/dallad, koofiyad food ballaaran leh, iwm.

U Samee Qoyskaaga Qorshaha Xaaladaha Deg-Degga Ah

Waxa laga yaabaa inayna qoyskaagu wada joogin markay aafadu dhacdo, markaa waa muhiim inaad u qorsheysato sidaad u wada xiriir lahaydeen, sida aad dib isugu iman lahaydeen iyo wixii aad samayn lahaydeen xaaladaha kala duwan. U sharrax khataraha jira carruurta oo kala shaqee sidii ay u diyaargarowi lahaayeen. Hubi inaad ku darto daryeel-bixiyeyaasha qorsheyntaada abaabulkeeda.

- Soo saar fal-celin aad ugu talagashay khatar kasta oo qoyskaaga laga yaaba ka hor iman kara. Tixraac goobaha internetka ee ku qoran jaldiga dhabarka ku yaal sidii aad u ogaan lahayd ficillada kala duwan ee looga baahan yahay khadarrada kala duwan.
- Soo saaro liis lambarrada xaaladaha deg-degga ah, ee ay ka midka yihiin qof magaalada ka baxsan oo aad la xiriir karto ka dib markay aafadu dhacdo. Bar carruurta goorta iyo sida loo isticmaalo lambarradan.
- Isku ogaada goob ka baxsan gurigaaga la iskugu yimaad iska markaaba, iyo waliba meel agagaarka ka baxsan haddii ay noqoto ineydaan guriga ku soo noqon karin si dhakhso leh.
- U qorshee dadka naafonimada iyo baahida gaarka ah leh. Ku haya sheyda caawinaya dadkaas meel loogu talagalay, sidii isla markaaba loo soo heli lahaa. Horraantaba, shirkadda tamarta u sii liiska qalabyada tamar-ku-tiirsanka taageerada noolaanta ee ay u baahan yihiin xubnaha qoyska. Soo saaro qorshe arrimaha ku-soo-booddada ah ee ay ka midka yihiin il tamareed beddel ah (alternate power source) u ah qalabka ama loogu talagalay sidii meel kale loo geyn lahaa qofka.
- Qorshe u samee rabbaayadihiina. Kaxaysta rabbaayadihiina markaad qaxdaan. Hase yeeshee, ogsoonow inaan laga oggolayn rabbaayadaha sida caadiga ah gabaadyadaha (shelters) dadweynaha ee xaaladaha deg-degga ah. Diyaari liis ay ku qoran yihiin qoyska, asxaabta, goobaha la seexdo ee cuntadana leh, dhakhaatiirta xawayaanka iyo hoteellada "rabbaayad-soo-dhaweyska" leh ee gabaad siin kara rabbaayada markay xaalad deg-deg tahay.

Taxanaha Hubinta Ficilka –Waxyaabaha la qabto ka hor Aafada

- Baro sida iyo goorta la damiyo biyaha, gaaska iyo korantada iswijyada muhiimka ama qasabadah oo la wadaag macluumaadan qoyskaaga. Qalabyada loogu baahan doono qasabadaha laga xiro gaaska iyo biyaha agtooda dhig. Dami isticmaalladaas kaliya haddii aad ka shakido inay wax gaareen meelaha ay soo maraan, haddii aad ka shikiod inuu jiro darroorsan ama saraakiisha deegaanku ay maraan in la sidaas la sameeyo.
- Ku rakib qalabayda digniinta qiiqa dabaqad kasta oo ka mid gurigaaga. Ka fikir inaad ku rakibto qalabka digniinta kaarbon monoksaydh (carbon monoxide).
- Hubi inuu qof kastaa yaqaan sida loo isticmaalo dab damiyeyaasha iyo meesha lagu hayo.
- Hubi inaad leedahay hoos imaad caymis ku-filnnaan leh. Caymiska dadka guryaha leh ma daboolo burburka ka yimaad daadka oo waxa laga yaabaa inuuna bixin daboolitaan buuxa waxyaabaha kale ee khatarta ah. La hadal wakiilkaaga caymiska sidii aad u hubin lahayd inaad leedahay hoos imaad caymis kaa ilaalilaya khasaaraha lacageed.
- Diiwaannadda qoyska muhiimka u ah iyo dukumentiyada kale ee muhiimka ah sida waraaqaha dhalashada iyo guurka, kaararka sooshal sekuuritiga, baasaboorrada, waraaqaha dardaaranka, dukumentiyada milkiyad lahaanshaha, iyo diiwaannada lacagaha, caymiska iyo talaallada waa in lagu hayaa sanduuqa keydinta badbaadada (safe deposit box) ama meel kale oo badbaado leh.
- Marka aafo jirto, sheyda iska caadiga ah ee guriga dhex yaal ayaa dhaawac iyo burbur keeni kara. Naaqus halisaha idin soo gaari kara:
  - Xirfad yaqaan waa inuu kuu hagaajiyaa xarkaha korantada ee xumaaday iyo isku xiranka dhuumaha gaaska darroorinta leh.
  - Waxyaabaha waayeyn ee culus dhig meel hoose oo dhulka ama sagxadda ah. Sawirrada iyo muraayadaha sur meel ka fog sariiraha.
  - Xakamee fadhiga iyo wax la midka ah ee dhaadheer, qalabyada guriga ee waaweyn iyo wayaabaha soo laalaada.
  - Hagaaji dalloolada saqafka iyo aasaaska ku yaal. Xakamee aasaaska guriga meeshiisa laga beddeli karo (mobile home).
  - Si badbaado leh u keydi sheyda sunta ama halista ah.
  - Iska hubi waxyaabaha dabka halistooda keeni kara.